



Sualaha Inta Badan La Isweydiyo (FAQ-yada) ee Hagida Db u furida Gobolka oo dhan

Ciyaaraha Dugsiga K-12, Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha (La Cusbooneysiyaay 09-04-2020)

Hoos waxaa ku yaalo jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) [Hagida Dib u furida Gobolka oo dhan – Ciyaaraha Dugsiga K-12, Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha](#) (Ciyaaraha Dugsiga K-12, Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha). OHA waxay u bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso inay bulshada fahamto hagida, inay ka jawaabaan su'aalaha daneeyeyaasha, iyo inay xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. Su'aalahaan Aalaaba la Isweydiyo (FAQs) waxaa la cusbooneysiin karaa muddo kadib. FAQ-yadan looguma talagelin inay galaan booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagida.

S1: Miyaa maaskarooyinka looga baahanyahay howlaha gudaha iyo kuwa banaanka labadaba ama ma waxaa loo baahan yahay kaliya haddii aan la kala fogaan karin lix (6) fuud?

J1: Horyaalada, hagayaasha, ciyaartoyda iyo tababareyaasha waxaa looga baahanyahay inay xirtaan maaskaro, daboolada wajiga ama gaashaanka wajiga, markii aad gudaha uga qeybqaadanaysid ciyaar. Horyaalada, hagayaasha, ciyaartoyda iyo tababareyaasha waxaa looga baahanyahay inay xirtaan maaskaro, daboolada wajiga ama gaashaanka wajiga, markii aad ka qeybqaadanaysid ciyaar banaanka ah oo aanan la joogteyn karin kala fogaansho jireed oo lix (6) fuud ah .

S2: Miyay jiraan wax ka-reebitaano ah oo ku saabsan sharuudaha maaskarada/wajo daboolada oo loogu talagalay ardayda ciyaartoyda ah ee horey u qaba xaalado caafimaad ee daciifiyo difaaca jirka?

J2: Maya. Waxaa jiro waqtiyo xadidan oo aysan ahayn inaad xirato maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolada adigoo joogo goob ku daboolan hagida gobolka oo dhan, oo ay ku jiraan markii aad qabanaysid howl ka dhigayso xirishada maaskarada, gaashaanka wajiga ama daboolada wajiga mid aan macquul ahayn, sida markii dabaalanaysid. Dugsiyada iyo degmo dugsiyeedyada waa inay la shaqeeyaan la taliyahooda sharci si loo hubiyo inay u hogaansamayaan Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka iyo Sharciga

Waxbarashada ee Shakhsiyaadka Naafada ah, iyo haddii kale sharciyada quseeyo.

S3: Miyay tilmaamaha wajiga uu gobolka kujiro quseeyaan Hagida Ciyaaraha Dugsiga K-12?

J3: Ciyaaraha [Dugsiga K-12, Hagida Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha](#) waa hagida gobolka oo dhan waxaana loogu talloagalay dhammaan degmooyinka iyadoon la eegayn wajiga uu gobolka ku jira. Hagida [Ciyaaraha Madadaalada](#) waxaa loogu talloagalay degmooyinka ku jiro Wajiga Labaad kaliya.

S4: Miyay dugsiyada u baahanyihiin inay u hogaansamaan tilmaamaha Dugsiyada Diyaarka ah ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon, tilmaamo kooxeedka Ardayda Baadqabka ah markii ay timaado ciyaaraha dugsiyada?

J4: Ciyaaraha dugsiyada waa inay raacaan xadeynada tirada usu imaanshaha ee lagu sheegay [Ciyaaraha Dugsiga K-12, Hagida Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha](#).

S5: Maxaa laga wadaa “nooc kamid ah waxbarashada goob jooga la yahay”?

J5: Ujeedooyinka [Ciyaaraha Dugsiga K-12, Hagida Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha awgeed](#), nooc kamid ah waxbarashada goob jooga la yahay waxaa loola jeedaa nooca waxbarashada goobta la joogo ama nooca ah iskudarka waxbarashada goobta la joogo iyo mida onlaynka ah ee loogu talloagalay ardayda.

S6: Miyaa kooxda dugsiga ee ciyaaraha leh istaabashada buuxda loo ogolyahay inay tababartaan, is-qaabeeyaan oo ay is-diyaariyaan haddiiba ciyaartoyda aysan sameynayn is-taabasho jireed?

J6: Haa, tababarka iyo is-qaabeynta waa la ogolyahay haddiiba ciyaartoyda aysan sameynayn is-taabasho buuxdo oo u dhaxeeyso iyaga.

S7: Miyaa munaasabadooyin ciyaareed oo badan laga ogolyahay inay isku wakhti ka dhacaan hal dhismo ciyaareed?

J7: Haa. Howlwadeenada dhismaha waa inay u hogaansamaan hagida munaasabadaha ciyaareed ee badan ee ku jirto [Ciyaaraha Dugsiga K-12, Hagida Ku Soo Noqoshada Xadidan ee Ciyaaraha](#).

S8: Maxaa loo baahanyahay si munaasabad ciyaareed ee kale loogu qabto isla xarunta ay mida hadeer ka dhacday? Ma waxaa loo baahanyahay nasiinyo 2-saacadood ah, tusaale ahaan, mise waxaa jiro sharuudo nadiifin?

J8: Ma jirto nasiinyo loo baahanyahay oo u dhaxeeyso munaasabadaha ciyaaraha; si kastaba, howlwadeenada dhismaha ciyaaraha waa inay hubiyaan in aagaga dadku ku badan yihiin sida albaabada laga soo galo, albaabadad laga baxo, miisaska soo gelitaanka, musqulaha iyo aagaga dhar beddelashada, la nadiifiyo oo la jeermisdila inta u dhaxeeyso ciyaaraha iyo munaasabadaha.

S9: Yaa xaqiijinayo in ciyaaraha K-12, ciyaaraha naadiga iyo ciyaaraha dhalinyarada ay u hogaansamayaan hagida, oo ay ku jiraan u hogaansanka mamnuucida ciyaaraha leh istaabasho buuxdo? Sidee ayaan u soo sheegaa xadgudubka?

J9: Cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada Amarka Fullinta Gofonatoraha 20-27 iyo Hagida Maamulka Caafimaadka Oregon waxaa lagu aadin karaa [Baadqabka Shaqada iyo Caafimaadka Oregon \(OR-OSHA\)](#) ama Maamulka Caafimaadka Oregon ee covid19.reopening@dhsosha.state.or.us.

S10: Maxaa ardayda loogu ogolyahay inay tababartaan iyo/ama tartamaan markii ardayda aysan ku soo laaban fasalka?

J10: Waa muhiim in la sii wado in lagu dhiirogeliyo ardayda inay ka qeybgalaan howlaha jireed ee loogu talloagalay fayoaqabka dhimirkooda, shucuurtooda, jirkooda iyo maskaxdooda. U ogolaanshaha koox yar inay ka qeybgalaan howlo ciyaareed waxay yareynaysaa halista faafida korona fayaska iyada oo weli la kobcinayo/barbaarinayo ciyaartoyda.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.